

Sharci Lamb 5 ee 30 Janaayo 1962

Wakiilashada Dowladda ee soo saarista Xeerka Ciqaabta, Xeerka Habka Ciqaabta, Xeerka Waddooyinka ee Xeer Nidaamiyaha Garsoorka

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA

Kadib markii uu helay ansixidda Golaha Barlamaanka.

WUXUU AMRAY

Qod. 1

Dowladdu waxaa loo igmaday in aay soo saarto 6 bilood gudahooda ka bilaabato maalinta oo uu hirgalo sharcigaan iyo iyadoo la tixgelinaayo soo jeedinta Guddiga ku xusan qodobka hoos ku qoran, Xeerka Ciqaabta, Xeerka Habka Ciqaabta, Xeerka Waddooyinka iyo Xeer-nidaamiyaha Garsoorka.

Qod. 2

Si loo taaba geliyo mashaaricda la xiriirta soo saarista Xeerka Ciqaabta, Xeerka Habka Ciqaabta, Xeerka Waddooyinka iyo Xeer-nidaamiyaha Garsoorka waxaa la dhisa Guddi gaar ah oo ka kooban:

Guddomiye: Wasiirka Caddaladda iyo Garsoorka;
Xubno: Xildhibannada uu Guddomiyaha Golaha Barlamaanka Qaranka soo magacaabo;
Guddomiyaha Maxkamadda Sare;
Xeer Ilaaliyaha Guud;
Garyaaqaanka Guud;
Dr. Haji Nur Mohamed;
Xeer Ilaaliyaha Arrimaha Shareecada;
Kornel Mohamed Ibrahim;
Dr. Paolo Contini;
La Taliye Dr. Renato Angeloni;
Howlwadeen Wasaaradda Dhismaha iyo Isgaarsiinta oo Wasiirka soo magacaabo.

Howlaha xoghaynimada waxaa wadi doo garsoor oo Wasiirka Cadaladda & Garsoorka.

Qod. 3

Sharcigaan wuxuu hirgeli doono maalinta ku xigto narkii lagu soo dabacay Faafinta Rasmiga.

Sharcigan waxaa lagu keydin doona Keydka Rasmiga ee Shuruucda waxaana lagu faafin doona Faafinta Rasmiga ah.

Waxaa la farayaa cid kasto in loo hoggansanadoo loona hoggamiyo cid kasta.

Muqdisho, 30 Janaayo 1962.

Aden Abdulla Osman

Raa'sul Wasaare oo ku meel gaarka

Abdirizak Haji Hussein

Wasiirka Caddalada & Garsoorka

Mohamud Ahmed Mohamed Addan